



War-Murtiyeedka Shirka Mideynta Miisaaniyadda Dalka.

**Mogadishu
27 September 2020**

Shirka Agaasimayaasha Miisaaniyadaha Dowlada federaalka, DXDFS iyo Maamulka Gobolka Banaadir oo ay soo qaban qaabisay Wasaaradda Maaliyadda gaar ahaan Agaasimaha Miisaaniyadda; shirkaas ayaa lagu qabtay magaala madaxda dalka ee Moqdisho **26- 27 September, 2020** si ay uga wada hadlaan arrimo la xiriira mideynta Miisaaniyadda dalka.

Shirka waxaa si gaar ah looga arrinsaday qadobada soo socda:

- Mideynta dukumintiyada la xiriira diyaarinta Miisaaniyadda
- Mideynta shax-xisaabedka dalka (chart of accounts)
- Sara u qaadista tayada iyo dardargalinta warbixinnada maaliyadda ee billaha ah.
- Abuuridda guddi ka kala socda wasaaradaha maaliyadaha ee dowladda federalka, DXDFS iyo Maamulka Gobolka Banaadir kuwaas oo ka shaqeeya arimaha la xiriira maaliyadda.

Shirka waxa si rasmi ah u furay Wasiir-kuxigeenka Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Federaalka, **prof: Cabdullaah Shiikh Cali.**

Shirka waxaa shir guddoomiyay Agaasimaha Miisaaniyadda DFS Mudane: **Ahmed Abdi Aadan (Iraad)**, iyadoo ay ka soo qeyb galeen Xisaabiyaha Guud Dawlada Federalka Somaliya Marwo:**Fadumo Osman Farah**, Agaasimaha guud ee Wasaaradda Maaliyadda Mudane **Saleiman Sheikh Umar**, Agaasimaha dakhliga, Agaasimaha Miisaaniyadda ee DXDFS iyo Maamulka Gobalka Banadir.

Agaasimayaasha ka dib markii ay dood dheer ka yeeshen qodobada ajendaha shirka waxay isla qaateen qodobada soo socda:

- In la sameeyo guddi isku dhaf ah oo ka kala socda DFS , DXDFS iyo Gobalka banaadir kaas oo ka shaqaynaaya qorshaha mideynta miisaaniyadda 2021.
- In guddiga uu tago dhamaan DXDFS iyo Gobalka banaadir min laba maalmood si loo helo xog dhameystiran ee la xiriirta mideynta Miisaaniyadda.
- In la mideeyo dhamaan dukumiinyatiyadda diyaarinta miisaaniyadda.
- In la mideeyo Muddo xiliyeedka diyaarinta Miisaaniyadda.
- In la mideeyo shax-xisaabeetka dalka oo dhan (chart of accounts) iyadoo la racaayo GFS 2014.
- In ay so gudbiyaan dhamaan DXDFS iyo Gobalka banaadir Miisaaniyaddoda 2021 ugu danbeyn **20 October 2020**.
- In la sameeyo kulamo joogta ah oo ay yeeshaan Agaasimayaasha Miisaaniyadda.
- In DFS ay abaabusho tababaro kor loogu qaadaayo xirafadaha shaqaalaha DXDFS iyo Gobalka Banaadir.
- In la sii xoojiyo ka shaqeyntii arrimaha wadaagga xogta maaliyadda (Fiscal Reports).
- In ay ka soo talo bixiyaan habka mideynta sistamyada maaliyadda SFMIS & BISAN.

Ugu danbeyntii Shirka waxaa soo xirey Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dowlada Federaalka Soomaaliya Dr. **Cabdiraxman Ducaale Beeyle** isaga oo bogaadiyay qorshaha mideynta Miisaaniyadda.